

Qiimaynada Gobolka oo dhan: Hagaha Ka Qaybqaadashada Waalidka / Masuulka iyo Macluumaadka Diidmada

Ka-qaybgalka ardaygaaga ee qiimaynaha gobolka oo dhan waa muhiim maadaama ay u oggolaanayso dugsigaaga iyo degmadaada inay hubiyaan dhammaan ardayda inay helaan waxbarasho tayo sare leh. Waagii hore, ardayda naafada ah iyo kuwa Ingiriisiga baranaayay inta badan waa laga saaray jiray iney ka qeyb qaatan qiimaynaha gobolka oo dhan. Iyadoo looga baahan yahay in dhammaan ardaydu ka qeyb qaatan qiimaynaha gobolka oo dhan, dugsiyada iyo macalimiintu waxay hayaan macluumaad dheeraad ah si ay u arkaan waxey dhamaan ardaydu sameenayaan. Tani waxay ka caawisaa dugsiyada inay si joogto ah u horumariyaan waxbarashada ay bixiyaan iyo inay aqoonsadaan kooxaha, fasalooyinka, ama maadooyinka laga yaabo inay u baahan yihiin taageero dheeraad ah.

Qiimaynadu waxay ku xiran yihiin heerarka

Qiimaynta gobolka oo dhan waxay ku salaysan tahay [Heerarka Tacliinta ee Minnesota](#) ama [Heerarka Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee WIDA](#). Heerarkan ayaa qeexaya aqoonta iyo xirfadaha ardaydu ay tahay inay wax ku bartaan dugsiyada dadweynaha ee K-12 iyo dugsiyada kale ee dadweynaha ee qaaska loo maamulo. Minnesota waxay mudnaan siisaa waxbarasho tayo sare leh, iyo qiimaynta gobolka oo dhan waxay siisaa barayaasha iyo hogaamiyayaasha fursad ay ku qiimeeyaan guusha ardayga iyo dugsiga.

Qiimaynada Dhamaystiran ee Minnesota (MCA) iyo Tijaabada Xirfadaha Waxbarashadeed ee Minnesota (MTAS)

MCA iyo MTAS waa qiimaynada sanadlaha ah ee akhriska, xisaabta iyo sayniska ee cabbira sawirka waxbarashada ardayga ee Heerarka Tacliinta ee K-12 ee Minnesota.

ACCESS iyo Alternate ACCESS ee loogu tala galay Bartayaasha Ingiriisiga

ACCESS iyo Alternate ACCESS waa qiimaynada sanadlaha ah ee bartayaasha Ingiriisiga kuwaas oo bixiya macluumaadka ku saabsan horumarkooda xagga barashada Ingiriisiga tacliimeed ee ku salaysan Heerarka Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee WIDA.

Qiimaynada Gobolka oo dhan Waxey Caawiyaan Qoysaska iyo Ardayda

Ka-qaybgalka qiimaynaha gobolka oo dhan waxay ka caawisaa qoysaska inay arkaan sawirka guud ee waxbarashada ilmahooda si ay ugu doodaan guushooda gudaha dugsiga. Ardayda dugsiga sare waxay u isticmaali karaan natiijooyinka MCA:

- Ku meelaynta koorsada kulliyadda ama jaamacadda Gobolka Minnesota. Haddii ardaydu helaan buundada u diyaarsan inay galaan kulliyadda, waxa laga yaabaa inaanay u baahnayn inay qaataan koorso dib-u-habeeyn ah oo maaddadaas ah.
- Ikhtiyaarada Diiwaangelinta Kadib-Dugsiga Sare (Postsecondary Enrollment Options , PSEO) iyo Kulliyadaha ee kujira barnaamijyada dugsiyada.

Bartayaasha Ingiriisida ee qaata ACCESS ama Alternate ACCESS oo buuxiya shuruudaha qaarkood waxay haystaan fursad ay kaga baxaan barnaamijyada bartayaasha Ingiriisiga.

Qaadashada Qiimaynta Gobolka oo dhan waxay caawineysaa Dugsiga Ardaygaaga

Qiimaynta gobolka oo dhan waxay bixiyaan macluumaadka ku saabsan dugsigaaga iyo degmadaada sida dhammaan ardaydu ula hawlan yihiin nuxurka ay ku bartaan dugsiga. Macluumaadkani waxey ka caawineysaa in:

- Barayaashu iney qiimeeyaan nuxurka ama macluumaadka ay ku gudbiyaan gudaha koorsada.
- Dugsiyada iyo degmooyinku aqoonsadaan sinnaan la'aanta kooxaha dhexdooda, inay sahmiyaan sababaha asaasiga u ah waxayna hirgeliyaan taageerooyin.
- Hogaamiyayaasha dugsiga iyo degmadu inay gaadhaan go'aano ku saabsan sida lacagta iyo agabka loogu isticmaalo si ay u taageeraan dhammaan ardayda.

Ka-qaybgalka Ardayga ee Qiimaynta Gobolka oo dhan

Ka-qaybgalka ardayga ee qiimaynta gobolka iyo tan deegaanka looga baahan yahay waa ikhtiyaarka waalidka/masuulka. Haddii aad doorato in ardaygaagu aanu ka qaybgelin qiimaynta gobolka oo dhan, fadlan ku qor foomka sababta ka danbeysa go'aankaaga.

La xiriir dugsiga ardaygaaga si aad wax badan uga ogaato qiimaynta maxalliga ah ee loo baahan yahay.

Cawaaqibiyada ka dhalan karaan Ka-qaybgal La'aanta Qiimaynta Gobolka oo dhan

- Ardaygu ma heli doonaan dhibcaha shakhsi ahaaneed. ACCESS iyo Alternate ACCESS, ardaygu ma heli doono fursad uu kaga baxo barnaamijkooda bartayaasha Ingiriisiga.
- Natijoyinka qiimaynta dugsiga iyo degmadu waxay noqon doonaan kuwo aan dhammaystirnayn, taasoo ka dhigaysa mid aad u adag in sawir sax ah laga helo waxbarashada ardayga.
- Maadaama dhammaan ardayda u qalma lagu daray xisaabaadka qaarkood xitaa marka aysan ka qayb qaadan, natijoyinka la xisaabtanka dugsiga iyo degmada ayaa la saameeyn doonaa. Tani waxay saamayn kartaa awooda dugsiga ee loogu aqoonsan karo taageerada ama guusha.

Ka sahmi bogga
Tijaabada Gobolka oo
dhan wixii macluumaad
dheeraad ah

(education.mn.gov >
Students and Families >
Programs and Initiatives
> Statewide Testing)

Ka hubi dugsiga deegaankaaga ama degmadaada si aad u aragto haddii ay jiraan cawaaqib kale oo ka dhalan karta qaybqaadasho la'aanta.

Macluumaad dheeraad ah

- Celcelis ahaan, ardaydu waxay ku qaataan wax ka yar boqolkiiba 1 wakhtiga waxbarida iney ku sameeyan qiimaynta gobolka oo dhan sanad walba.
- Xeerarka Minnesota ayaa ku xaddida tirada guud ee wakhtiga ardaydu ku qaadan karaan qiimeynada degmo kale ama dugsiyadoo dhan ah ilaa 11 saacadood ama ka yar sanad dugsiyeedka kasta, iyadoo ku xiran fasalka.
- Dugsiyada degmooyinka iyo dugsiyada dadweynaha ee gaarka loo maamulo waxa looga baahan yahay inay ku daabacaan jadwalka qiimaynta shabakadooda bilowga sannad dugsiyeed kasta. Tixraac bogga dugsiga degmadaada ama dugsiga dadweynaha ee gaarka loo maamulo wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimaynta.

(Xasuus qoris: Foomkan waxa kaliya oo lagu dabaqi karaa sannad dugsiyeedka 20 ____ ilaa 20__.)



Qiimeynada Gobolka oo dhan: Go'aanka Waalidka/Masuulka ee ah in Aanu ka-qaybgelin

Buuxinta foomkan, waxaad qiraysaa in ilmahaagu aanu ka qayb qaadan doonin qiimaynaha gobolka oo dhan oo aanu heli doonin natiijooyinka qiimaynta ee shakhsi ahaaneed. Foomkan waa in lagu soo celiyaa dugsiga ardaygaaga ka hor inta aan la qaadin tijaabada lagu dabaqi karo.

Macluumaadka Ardayga

Magaca ugu Horeeya: _____

Xarafka Bilowga ah ee Magaca Dhexe: _____

Magaca ugu Danbeeya: _____

Taariikhda Dhalashada: ____/____/____ Fasalka Hadda ee Dugsiga: _____

Dugsiga: _____ Degmada: _____

Magaca Waalidka/Masuulka (daabac): _____

Saxiixa Waalidka/Masuulka: _____ Taariikhda: _____

Sababta Diidmada:

Fadlan ku qeex qiimaynta(nada) gobolka oo dhan inaad ka dhaafeyso ardayga sannad dugsiyeedkan:

____ MCA/MTAS ee Akhrinta

____ MCA/MTAS ee Sayniska

____ MCA/MTAS ee Xisaabta

____ ACCESS/Alternate ACCESS

La xiriir dugsigaaga ama degmadaada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida la iskaga dhaafo qiimaynaha maxalliga ah.